IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 30 Agoosto 1982 L. 2 r 8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Ganshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

S H A R C I

QAYBTA KOWAAD

W. M.

QAYBTA LABAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 26 ee 14 Agoos. 1982, Dhisid Maxkamado Dagaal ee Ciidamada Qalabka sida. BOG. 671

SHARCI L. 27 ee 9 Agoos. 1982, Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Nabad gelyada ee Qaranka. » 674

SHARCI L. 28 ee 21 Agoos. 1982, Isbiddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1981. » 677

SHARCI L. 29 ee 21 Agoos. 1982, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1982. » 679

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER SHARCI Lam. 4 taariikh 11 Agoos. 1982 Dhoofinta Badeeco lagu soo bed deli karo Badeeco kale.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Go'aankii Golayaasha ee ku saa san dib u habeynta dhaqaalaha, qaybta dhiirrige linta Ganacsiga Bibadda.

MARKUU ARKAY: Barnaamijka Dawladda ee Gola ha Shacbiga Qaranku ku ansixiyey Kalfadhigiisii Koowaad, qayba ku saabsan Ganacsiga Dibedda.

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan ahay in la qaado tillaabo kasta oo u horseedeysa horu marinta alaabta dibedda loo dhoofiyo, si ay u koro dho awoodda Lacagta Adag ee Dalka.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay habboon tahay in hi rgelinta taladaas deg deg loo fuliyo, laguna jidee yo Xeer Sharci si dib u dhac looga furto.

MARKUU TIXGELIYEY Soo jeedinta Wasiirada Wa saaradda Ganacsiga, Maaliyadda iyo Kalluunka.

DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharciga soo socda:

Qod. 1aad.

1. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, isagoo dhegeys tay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasiir kii kale oo ay arrintu khuseyn karto, wuxuu awood u leeyahay inuu fasaxo dhoofinta Kalluun ka qalalan, alaabta Farshaxanka (tan Gacanta la gu sameeyo ama Badda laga soo saaro) Cusbada iyo Badeecadaha kale ee yar yar ee Dalka laga soo saaro.
2. Badeecadaha habkan lagu dhoofiyey, qiimahooda oo Lacag Adag ah waxaa lagu soo celinayaa Dalka muddo cayiman gudaheeda.

3. Dhoofiyuhu wuxuu qiimaha Badeecadda ku keeni karaa alaab ay ka mid yihiin: Bun, Bateriga Raadi yaha, Xawaaji (Qorfe, Hayl, Sanjabiil Filfil Toon IWM) Bataato iyo qalabka Kalluumeysiga.

4. Badeecadaha ku qeexan faqradda hore waxaa laga keenayaa oo keliya Dalalka loo dhoofiyey Kalluun ka qalalan, alaabta farshaxanka, cusub, IWM.

Qod. 2aad.

Fasaxa dhoofinta ee Wasaaradda Ganacsiga waa in lagu sheegaa qiimaha badeecadda la dhoofinayo iyo muddada qiimahaas lagu soo celinayo, Lacag Adag ah aan ama Badeecada ahaan.

Qod. 3aad.

Badeecadaha ku tilmaaman Qod. 1aad, Faqradda 3aad ee Xeer Sharcigan waxay Dalka ku soo gelayaan sicirka caalamiga ah ee Badeecadda, dadweynahana waxaa looga Iibinayaa sicirka marba ay u goyso Wasaa radda Ganacsigu.

Qod. 4aad.

Haddii qiimaha Badeecadda Ganacsaduhu Dibedda ka keenay uu ka badan yahay qiimaha Badeecaddii uu Dibedda u dhoofshay, inta farqiga ah waxaa loo qaada nayaa in Dalka lagu soo geliyey ICTIMAAD LA'AAN, waana lala wareegayaa iyadaoo aan Ganacsadaha la siin wax magdhaw ah.

Qod. 5aad.

1. Ganacsadaha loo fasaxo dibad u dhoofinta Badeeca daha ku tilmaaman Qod. 1aad ee Xeer Sharcigan, wuxuu dhigayaa curaar damaanad ah.
2. Haddii uu Dalka ku soo celin waayo qiimaha Badee cadda uu dhoofiyey waqtigii loo qabtay gudihiisa, curaarta waxaa la wareegeysa Wasaaradda Maa liyadda.

3. La wareegidda curaarta kama reebeyso dhoofiyaha Ciqaabta ku tilmaaman Qod. 10aad ee Xeer Sharci gan.

Qod. 6aad.

1. Wasaaradda Ganacsigu, iyadoo la tashatay Wasaa radda Maaliyadda, waxay u dejineysaa Fasaxa Ba deecadaha habkan lagu dhoofiyo qaab gaar ah oo lagu tilmaamayo Shuruudaha dhoofinta, muddada soo celinta qiimaha Badeecadda, muddada Fasaxa dhoofintu dhaqangal yahay, Dekadda laga dhoofina yo, magaalada ay ku socoto, gaadiidka lagu qaada yo, IWM.

2. Si kastaba ha ahaatee, muddada dhaqangalka fasu xu kama badnaan karo Saddex Bilood oo hal mar la cusbooneynsiin karo intaa in la eg.

Qod. 7aad.

Hubinta isweydaarsiga alaabtani iyo ilaalinteeda waxaa loo xil saaray Wasaaradda Ganacsiga, Wasaa- radda Maaliyadda iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Qeybta ilaalinta Canshuuraha, oo Saddexdii Biloodba mar tirakoob ka sameyn doona si loola socdo heerka wax isdhaafsiga Ganacsiga habkani uu marayo.

Qod. 8aad.

1. Wasiirada Wasaaradaha Ganacsiga, Maaliyadda iyo Kalluunka waxay Go'aan ka gaarayaan xallinta fa- saxyadii Badeecad dhoofintahabkan ku saleysan ee la baxshay inta aan la joojinin wax ku keenidda ha- bka ictimaad la'aanta (F.V.) Dalkana aan dib loo gu soo celinin Badeecad u dhiganta qiimaha Xoo lihii la dhoofshay.

2. Badeecadaha la oggolaan karo Ganacsatada kor ku tilmaamanin ay Dalka soo geliyaan waa kuwa ku sheegan Qod. 1aad, Faqradda 3aad ee Xeerkan

Qod. 9aad.

Wasiirka Wasaaradda Ganacsigu wuxuu Lixdii bil loodba Golaha Wasiirrada warbixin ka siinayaa dhaqdhaqaaqa Ganacsiga ee Sharcigan ka aloosmay heerka uu joogo iyo waxa uu ku kordhiyey awoodda Lacagta Adag ee Dalka.

Qod. 10aad.

Dhoofiyihii ku soo celin waaya Dalka qiimaha Badeecaddii uu dibedda u diray muddada loo qabtay guda heeda, Lacag Adag ahaan ama Badeeco ahaan, wuxuu la mid yahay qof sharci darro Dalka uga saaray Badeecad, waxaana lagu qaadayaa Sharciga tirsigiisu yahay 54 ee 1da Jennaayo 1975.

Qod. 11aad.

Xeer Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 11 Ago. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)